

Horadhac

Anaga, Gollaha Deegaanka Magaalada Bloomington iyo Guddida Dugsiga, waxaanu aqoonsanahay in wakhtiyada hadda ay muujiyeen jawi cadho, baqdin iyo werwer ku xeeraan socdaalka. Xaaladahaan waxay abuureen shilal iyo hubaal la'aan bulshaddayada gudaheeda taas oo aad u dhab ah. Oo halka ay ka jirto kala duwanaanshahu qaarkood waxaa jira hubaal la'aanta dhammaan ah.

Warbixinta Socdaalka

Waxaanu rumaysanahay in kala duwanaanshahu uu yahay mid ka mid ah awoodahayaga ugu waa wayn. Waxaanu soo dhowaynaa bulsho qani ku ah oo qurux ku leh kala nooc ahaanshaha asalka wadan, isirka, sinjiga, diinta iyo aqoonsiyada kala duwan.

Waxaanu nahay hal Bloomington oo ku middoobay rabbitaankayaga si loo dhiso bulsho xoogan taas oo aynu dhammaan xiisayn karno. Xubnaheena bulshaddu waxay leeyihiin xaq ay ugu noolaadaan noloshooda si sharaf leh, ka madax banaan dhibaatayn iyo takoor sharci darro ah.

Magaalada Bloomington iyo Dugsiyada Dad waynaha Bloomington waxaa ka go'an:

- La shaqaynta bulshooyinka kala duwan ee Bloomington si loo aqoonsado tallaabooyinka saamaynta leh;
- Ka dhigista adeegyada kuwa la heli karo oo loo siman yahay dhammaan iyaddoon la eegin xaalada sharciga socdaalka;
- Ula dhaqanka dhammaan kuwa ku nool, wax ka barta, ka shaqeeya, wax ku caabuda, oo ciyaara si sharaf leh; iyo
- U doodista xoriyadda madaniga, xuquuqda aadamaha, xoriyadaha, iyo xiisaha.

Waxaanu ku marti qaadaynaa bulshadda inay ku soo biiraan Magaalada iyo Dugsiga Degmadda in:

- Laga qayb galo wada sheekaysiyada socda ee bulshadda ee ku saabsan socdaalka iyo sinaanta;
- Loo wada shaqeeyo si loo gaadho xuquuqda aadamaha iyo sharafta dhammaan ah; iyo
- In la barto wax badan oo ku saabsan jaarkaaga ka socda dhammaan dhaqanada.

Anagoo ku hadlayna magaca ururada xishmadda leh, anagu, Gene Winstead, Duqa Magaalada Bloomington, Minnesota, iyo Ricardo Oliva, Guddoomiye Guddida Dugsiga Bloomington, halkan waxaanu ka xaqiijinaynaa u heelanaanta qimiyamkayaga iyo rumaysnaanta sinaanta, isku dhafnaanta, reer magaalnimada, iyo dul qaadka.

Ku taariikhaysan 30ka Maayo, 2017



Gene Winstead, Duqa Magaalada
Magaalada Bloomington



Ricardo Oliva, Guddoomiye
Guddida Dugsiga Magaalada

